Bundesamt
für Migration
und Flüchtlinge

Warqad qeexaysa Koorso ku saabsan Isdhexgalka Bulshada

Koorsahaan ama Waxbarashadaan waxaa laga doonayaa,

- Dadka isdhiibey, ee haysta Sharciga kumeelgaarka ah sida ku qeexan Sharciga Iqaamadada Qodobka § 55 Qaybta. 1aa,oo ay u badan tahay in ay Waddanka Jarmalka Weligooda joogayaan, oo ay ku noolaan doonaan.
- Dadka Ajnabiga ah ee haysta Waradda Duldungka loo yaqaano, waa sida ku qeexan Sharcigaas Qodobkiisa § 60a Qayba. 2aad Cutubka 3aad ee Sharciga Iqaamadda.
- Dadka Ajnabiga ah ee haysta Waradda Aqoonsiga Rasmiga ah sida ku qeexa Sharcigaas Qodobkiisa § 25 Qaybta. 5aad ee Sharciga Iqaamadda.

Mudanayaal iyo Marwooyin,

Iyadoo la eegaayo Sharciga Ceerta iyo kan Iqaamadda, ayaa waxaa laguu sheegayaa, in lagaa doonaayo oo ay tahay Waajib ku saaran, in aad ka qayb qaadatid Waxbarashada ama Koorsaha loogu talogalay in lagu barto isdhexgalka Bulshada.

Waa maxay Koorsaha isdhexgalka Bulshada?

Koorsaha ama Waxbarashada isdhexgalka Bulshada waxaa uu ka kooban yahay Laba Qaybood. Koorso Afka Jarmalka lagu qaato iyo Midka Labaad oo Isagu lagu barto sida Waddanka loo fahmi lahaa.

Koorsaha Afka Jarmalka lagu bart, waxaad ku baran doontaa Ereyo badan, oo aad ugu baahan tahay sida aad Dadka aad la nooshahay Afka Jarmaka kula hadli lahayd. Maadooyinka ama Mawaadiicda Koorsaha Afka kubaran doontid waxaa ka mid ah, Sida aad Xafiisyada Dowladda Hawlaha kaaga xiran uga dhamaysan lahayd, sida Deriskaaga ula shaykaysan lahayd iyo weliba sida Waraaqaha loo akhristo, loo qoro, Dalabyada loo buuxiyo.

Koorsaha labaad ee loogu talo galay Fahanka Wadanka, waxaad Kaasi ku baran doontaa sida Jarmalka loogu dhaqmo. Waxaad kaloo ku baran dontaa Qawaaniinta iyo Habdhaqameedka Waddanka u degsan, Hidaha iyo Taariikhda Wadanka.

Markaa Koorsanaah Isdhexgalka loogu talo galayay, waa 600 Casharo oo Afka lagu barto (Halkii Casharba waxaa uu socdaa 45 Daqiiqo) iyo Koorsaha Fahanka Wadanka waa 100 Casharo. Koorsaha Afka waxaa loo qaybshay Lex Koorso, markaa Koorsihiiba waxaa uu socon doonaa 100 Casharo. 300 ee ugu soo horeeya, waa Bilaw, 300 kale ee ku xiga waa Kuwo aad si fiican Barashada Afka u dhexgeki doontid.

Waxbarashadaan ama Koorsahaan waa lagama maarmaan, oo xitaa waxaa la diyaarshay Koorso khaas ah oo haddii loobaahdo si khaas ah Dadka Qaarkood sida Dumarka, Dadka Waawayn

KNr. 630.122a (Somalisch) BAMF

Dhalinta iyo Dadka aan si fiican Wax u akhrin karin ama Wax u qori karin loo siin karo, Koorsanaas Khaaska ah markaa waxaa uu ka kooban yahay 1000 Casharo.

Haddii aad doonaysid in aad si deg deg ah Koorsaha isaga dhamayn rabtid oo aad si deg deg ah Wax u baran kartid, Taasna waa aad yeeli kartaa oo waxaa jira Koorso 430 Casharo oo keliya kakooba ee kaas aad.

Hay'adda Koorsahaan bixin doonta, Imtixaan bay kaa qaadi doontaa si ay u ogaato Heerka ay Aqoontaada joogto. Imtixaankaas kooban bay ku ogaanayaan Haddii aad Koorsaha Meel Hoose oo Bilaw ah ka bilaabi doontid ama aad Meel Sare ka belaabi kartid, Imtixaankaas waa Bilaash oo Wax Lacag ah lagaama rabo.

Imtixaanka Qalinjibinta ama ugu danbeeynta

Imtixaanka ugu danbeeya ee ka kooban Midka Afka iyo Midka Isfahanka Bulshada, Kaasoo lagu magacaabo „Leben in Deutschland". Haddii markaa Imtixaanka Afka aad ku goolaysato oo aad keentid Buundada "B1" loo yaqaano, oo Haddana aad Kan kale ee "Leben in Deutschland" la yiraahdo ku guulaysato, waxaa markaas noqonaysa Qof Koorsaha Isdhexglka Bulshada dhameeyay, markaa waxaa lagu siinaya Shahaado Taaso loo yaqaano "Zertifikat Integrationskurs".

Haddii aad Imtixaanka Mid ama Labadaba ku dhacdid waxaa lagu siinayaa Warqad Caddayn ah oo qeexaysa in Buundada aad Koorsahaas ku gaartay.

Imtixaanka waa Lacag la´aan.

Sida Koorsaha laysku soo diiwaan gelso

Waxaa ku soo gaari doonta Warqad laguugu sheegayo in lagaa doonaayo in aad Koorsaha ka qayb qaadatid, Warqaddaas ku soo gaari doonta waxaa loo yaqaanaa (Verpflichtungsschein), Warqadda waxaa ay kaaga imaanaysaa oo kuu soo diri doonaa, Qolada Ceerta ku siisa ee Lacgtaada Masuul ka ah.

Fadlan, markaa waxaa lagaa doonayaa, waa marka ay Warqadda Noocaas ah ku soo gaarto in aad iska soo qortid Hayadda Koorsooyinka bixisa, ee laguu sheegay, Warqadda kuu timid, ee (Verpflichtungsschein) loo yaqaano Hayadda tus oo markaa way garanayaan Waxa lagaa rabo. Haddii aan laguu Sheegin Meesha aad Koorsaha ka helayso, waxaad Adigu raatsataa Hayad kale oo aad Adiga ku qanacsan tahy oo Meeshaas iska diiwaangeli. Warqadda waxaa ku qoran Muddo kooban oo, fadlan inta aan Mudada dhamaanin is soo qor.

Waxaadse ogaataa Xaafiiska Federaalka ee arrimaha dalabka Qaxootinimada, waxaa uu yeelikaa in uu si deg deg ah kuugu diro Meel aad Koorso si deg deg ah uga helaysid, si loo hubsado in aad Koorso deg deg ah heshid buu taasi u yeeli karaa.

Markaa Hayadda baa kuu sheegi doonta Marka uu Koorsahaaga bilaabmi doono. Laakiin Caadi ahaan markaad is soo qortid Lix Todobaad gudahooda Koorsaha baa kuu bilaabmi doona. Haddii aad Lix Todobaad sugto oo Cid kuu soo jawaabta waydid, markaa Hayadda ku noqo oo xasuusi in aad Meesha iska qortay. Markaad Hayadda u sheegto in aad in Badan sugaysay.

Waxaad ogaataa in uu Ogolaasha kaa dhici doono haddii Adigoo aan Wax Xujo ah oo lagu qanci karo haysanin, Muddo Hal Sano ah Koorso raadsanin, ama inta aad bilaawdid Muddo Hal Sano ah Koorsada ka maqnaatid.

Sida ugu haboon ee Koorsaha loo qaato

Si markaa aad Koorsahaan Muhiimka ah ugu guulaysatid waxaa aad u haboon in Koorsaha ka baaq baaqanin oo aad Mar Walba tagdid. Casharada oo dhan ka qayb qaado oo ha gooynin, ilaa uu Koorsaha ka dhamaanayo, oo markaa Imtixaanka si fiica uga qay qaado. Sida haboon ee Koorsaha loo qaato Iyada Lafteeda aad bay Muhiim kuugu tahay, haddii aad Cashiro Afka ku soo ceshan rabtid, Taasi waa laguu ogolyahay, oo Hayadda baa kuu markhaadi kici doonta in aad Maalina gooynin, oo aad Cashirada oo dhan ku soo noqsatay.

Sida Hayadda Koorsa bixisa Mid kale loogu bedesho

Bedelesho aad iska bedeli kartid Koorso, waxaa keliya ay suurtogal ku tahay haddii aad Hal Qayb oo Koorso dhamaysid. Sidoo kale Bedelesho waxaa keliya la ogolaanayaa haddii ay jirto Sabab Muhiim ah oo lagu qanci karo, sida haddii aad Gurigaaga ka guurto, ama Koorso akel oo Midka aad ku jirtay kaduwan kuu soo dhaco, ama Koorsada aad u bedelan rabtid uu Caruurta kaa hayn karo, ama Shaqo Meel ka heshid, ama Qolada Koorsada ku siin rabta ay kuu ballan qaado in aad u shaqan doontid.

Haddii aad laakiin Sababo kale aan kuwaan ahayn Koorso isaga tegtid oo aad Mid kale bilaawdid, waxaa ay u badan tahay Casharada ku dhaafay in aan kuu soo noqon doonin.

Haddii aad Iskoolka ama Hayadda ka tagaysid oo aad tagaysid Iskuul kale markaa Hayadda aad la joogtay waa in ay Warqaddii aad u keentay kuu soo celisaa.

Lacagta ku baxda Koorsaha Isdhexgalka Bulshada

Adiga horta Wax Lacag ah lagaama rabo. oo Koorsha waa kuu free.

Caruurta waa laguu hayn karaa

Haddii aad u baahan tahay in Caruurta laguu haayo Markau u Koorsaha kuu bilaabmo, Taasi aa aad codsan kartaa, oo u sheeg Cidda ku siinaysa Koorsaha, Iyaga ayaa ku siin doona Talo ah haddii ay Jirto Meel Caruurta lagu haayo.

Lacagta ku baxda Iskool aadista

Haddii aad tahay Qof qaata Ceer, oo aad tahay Qof Sabool ah, waxaad Xaq u leedahay in Kharashka ku baxa Tikidka aad Koorsada ku aadid Qaar lagaa baxsho, oo waxaa lagu siin karaa Qayb Lacagtaas ka mid ah, oo Maalinii aad Koorsaha aadidba waxaa laguu soo celinaaa Qayb ka mid ah Lacagta aad Baska ku raacday. waxaadse ogaataa Kharashaka waxa keliya lagu ogolaadaa haadiii Meesha aad Koorsada ku baranaysad ay ugu yaraan 3 km ka fog tahay Guriga aad Adigu deggan tahay. Laakiin waa in aad Adiga Arji ama Dalab u qorataa Hayadda ama Xafiiska Qaxootiga qaabilsan oo aad ku codsanaysid in ay Kharashka kaa bixiyaan. Dalabkaaga waxaad u dirsan kartaa Laanta Xafiiska Qaxootiga qaabilsan ee ay ku leedahay Meesha aad deggan tahay. . Cinwaanka Xafiiska halka uu ku yaalo waxaad ka heli kartaa Internetka Cinwaanka: www.bamf.de Halkaas ka raadso, oo Meesha ay „Suche“ ku qoran tahay ku qor Ereyga „Web-GIS“ markaa

Meeshaas baad ka sii raadsan kartaa oo ku qor Ereyga „ Zuständige Regionalstelle mit Regionalkoordinator“ markaa ka bacdi riix Ereyga kuu soo baxa ee „Suche“ ah.

Koorsaha Afka ugu badnaan 300 Casharo ayaad ku soo ceshan kartaa

waxaa laguu ogol yahay in aad Afka barshadiisa 300 Casharo ku soo ceshato, waa haddii aad Casharadii hore oo dhan joogto u qaadanaysay laakiin aad u baahatay n aad ku soo ceshato. Waayo Imtixaankii “B1” ahaa baad ku baasi waysay.

Laakiin inta aadan ku soo ceshan kahor waxaa loo baahan yahay in aad Dalab soo qoratid. Fadlan Dalabka Noocaan ah ku hagaaji Hayadda Qaxootiga ee kuugu dhaw ee Hawlahaaga Masuul ka ah.

Haddii aad u baahan tahay Koorso Bilaw ah oo ABC lagaaga soo bilaabi rabio markaa Mitixaanka ugu horeeya ee lagu ogaan lahaa Heerka Aqoontaada looma baahna, Imtixaan hore geli maysid.oo markaa 300 Cashar waad kuu soo ceshan kartaa.

Macluumaat ku saabsan Waajibka saaran Qofka Koorsaha qaadanaya

Maadaama aad tahay Qof Ceer qaata oo Qolada Ceerta bixisa kugu dhahaday in aan Koorsaha Noocaas ah ka qayb qaadatid, waxaa markaa waajib kugu ah in aad Arintaan sida ugu deg degta badan u yeeshid. oo aad markaa Koorsaha Joogto u booqatid.

Haddii aad sidaas yeelin, ogow waxaa macquul ah in Ceerta lagaa yareeyo.

Haddii aad Hayad Koorso bixisa iska soo xaadirisay, waa in aad Hayadda Ceerta Caddayn u keentaa in aad Hayad Koorsaha ku bari rabta heshay.

Hayadda Koorsada bixisa Iyada waxaa laga rabaa in ay Hayadda Ceerta u sheego haddii aad Koorsa joogo u tagin oo aad ka baaq baaqanaysid.

Waxaa kaloo dheeraad ah oo in aad ogaato lagaa rabaa

Dalabyada loo baahan yahay ee aan Warqadaan ku sheegna oo dhan waxaad ka heli kartaa Meesha Koorsaha laga bixiyo iyo Xafiiska Laanta Socdaalka ee aad Sharciga Aqoonsiga ka soo qaadatidna waa laga helaa Araajiyadaan ama Dalabyadaan iyo Hayadda Qaabilsan Qaxiitida ee kuugu dhaw, halkaasna waad ka soo qaadan kartaa Dalabyadaan. Sidoo kale Internetka www.bamf,de/formulare, waad ka heli kartaa.

Sidoo kale waxaad la socotaa Waxyaabaha kale ee ay kuu diyaarsheen Heyadaha caawiya Dadka qaxootiga ah, Hayadaha Dhalinyarada caawiya. Waxaa ay diyaar kula yihiin in ay ku caawiyaan, waa haddii aad doonaysid, Wax Kasta oo aad waydiiso bay Jawaab kaa siin karaan, Dhibaatadaada u sheego, waxay kaloo kaa caawin karaan in ay kuu raadshaan Koorso Adiga kuu haboon. Halka aad Hayadahaas Dadka Qaxootoga iyo Dhalinyarada caawiya ka heli kartid waa, Xafiiska Degmadaaya ku yaalla ee Qaxootoga qaabilsan ee Sharciga laga soo qaato ama Xaafiiska Federaalka ee arrimaha dalabka Qaxootinimada, amaba Internetka waa laga helaa.

Warqadaan waxaa lagu soo koobay Macluumaadda ugu muhiimsan ee aad u baahan tahay in aad ogaato si aad markaa Koorsahaan u qaadatid. Wixii Dheeraad ah ama Su´aalo ah waxaa Jaqaab kaa siin kara Hayadda Koorsaha bixisa.

Waqtiga aad Koorsaha ku sii socotid ma tihid Qof Caymis ku jira, oo haddii uu Shil kugu dhoco Caymis kuma jirtid.

Waxaan kuu rajaynaynaa in aad Koorsahaan ku guulaysan doontid!